



# Codsashada Kaalmada Ku- meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan?

## Haddaba maxaan sameeyaa?

*Haddii aad diyaar u tahay in aad dedejiiso shaqadaada, eeg Barnaamijka Commerce WorkFirst!*

**COMMERCE WORKFIRST** La Sahami Kartidaada Shaqo Commerce WorkFirst! Haddii aad hadda bilaabeyso ama dhiseyso xirfado jira, Commerce WorkFirst waxaa uu bixiyaa barnaamijyo loo habeeyay habaqtirka baahiyadaada iyo in ay kaa caawiyaan in aad qaato tallaabooyin ku wajahan shaqo xasillan oo abaalmarin leh. Barnaamijka Shaqooyinka Bulshada wuxuu bixiyaa ilaa sagaal bilood oo taageero ah, oo ay ku jiraan ikhtiyaaro aan waqti buuxa ahayn oo loogu talagalay waalidiinta kaligooda ah ee haysta carruur ay da'doodu ka yar tahay lix. Barnaamijka Shaqooyinka Bulshada, oo soconaya inta u dhaxeysa hal ilaa laba iyo toban bilood, ayaa habeynaya saacadaha ka-qaybgalka si ay ugu habboonaadaan duruufahaaga gaarka ah. Wax kasta oo uu yahayba raadraacaaga ama heerkaaga waayo-aragnimo, Commerce WorkFirst waxaa ka go'an in uu kaa caawiyo sidii aad u guuleysan lahayd.

### Barnaamijyadeenna waxaa ay:

- Tababbarka shaqada lagu qaato iyo waayo-aragnimada shaqo ku daraan adeegyada taageerada iyo horumarinta xirfadaha.
- Kaa caawinayaan in aad hesho goobo shaqo oo dhisa danahaaga, xirfadahaaga, iyo awoodahaaga xirfadeed.

### Shaqooyinka Bulshada/Horumarinta Xirfadaha waxaa ay:

- Abuuraan taariikh waxbarasho iyo mid shaqo oo awood badan leh waxayna daraaseeyaan sida loo helo shaqada saxda ah iyadoo loo marayo waxqabadyada shaqo-u-diyaar-garowga iyo shaqo u gaarsiga ee adiga oo kaliya loo nakh-shadeeyay.
- Helaan towjiihin shakhsi, xiriirro bulsho iyo taageerada caqabadaha shaqada k u saleysan.

### Shaqooyinka Bulshada waxaa ay:

- Helaan waayo-aragnimo shaqo iyo tixraacyo loogu talagalay taariikhda shaqo iyo midda waxbarashada adiga oo sii kordhinaya xirfadahaaga.
- Helaan taageero ku wajahan dariiq waxbarasho, marka aad ku jirto kala-guurka hawlaha, ama aad leedahay mudnaano tartamaya.
- Hal ilaa laba iyo toban bilood oo waayo-aragnimo shaqo ah marka aad kala-guurka ku jirtid ama haddii aad dooneyso in aad dhiso xirfadaha shaqo.

## Ma u muuqataa in ay tahay mid xiiso leh?

**Weyddii maamulaha  
kiiskaaga ee Waaxda  
Adeegyada Caafimaadka  
iyo Bulshada u gudbinta  
tababaraha xirfadda ee  
Commerce WorkFirst.**

